

## Xayawaannada xarumaha caafimaadka

(Animals in healthcare facilities)

# Booqashooyinka xayawaanka rabaayada ah

## (Pet visits)

Xayawaannada rabaayada ah ayaa lagu soo dhawaynayaa in la geeyo xarumaha Alberta Health Services. Booqasho ka timid xayawaan rabaayad ah ayaa u fiican caafimaadka bukaanka iyo faya qabka.

Marka aad xayawaan u keento booqasho, adiga ayaa masuul ka ah xayawaankaas rabaayada ah iyo wax kasta oo xayawaanka rabaayada ah ka sameeyo xarunta caafimaadka.

Si loo sugo amaanka qof kasta, raac tilmaantaan ku aadan booqashooyinka xayawaanka rabaayada ah.

### Macluumaadka Guud

#### (General information)

Kahor inta aadan xayawaanka raabada ah keenin xarunta caafimaadka:

- Ka hel ogolaansho maamulaha waaxda kahor intaadan xayawaanka rabaayada ah keenin.
- Xaqiji in xayawaanka rabaayada ah uu caafimaad qabo, dagan yahay, si fiican u dhaqmaayo, uuna tababaray yahay.
- Ku xir xayawaanka rabaayada ah xarig ama salada lagu qaado.

Inta lagu jiro booqashada:

- U oggoloow adiga iyo bukaanka aad booqanayso kaliya inaad taabataan xayawaanka rabaayada ah.
- Farxalo kahor iyo kadib marka aad taabato xayawaanka rabaayada ah.
- La joog xayawaanka rabaayada ah booqashada oo dhan.
- Nadiifi khaladaad kasta oo ka dhaca xayawaanka rabaayada ah (saxaro ama kaadida) haddii ay dhacdo.
- Saar shukumaan ama suuf sariirta bukaanka ama dhabta si xayawaanka rabaayada ah ugu fariisto.
- Xaqiji in xayawaanka rabaayada ah uusan caqabad ku noqon daawaynta bukaanka. Waa **inuusan** taaban wax kamid ah agabka caafimaadka ee bukaanka, fiilooyinka korontada aha xargaha kale, tuubooyinka, ama dhaawacyada.
- Guriga u kaxee xayawaanka rabaayada ah haddii uu dareemaayo walaac ama niyad jab. (Ha uga tagin xayawaanka rabaayada asagoo keligiis ah gaariga. Waa lagu dacwayn doonaa.)



## Eyada adeegga iyo eeyada dadka haga

(Service dogs and guide dogs)

Kooxda eeyga adeegga ama hagista ee u qalma ayaa ah mulkiilaha eeyga ama iyo eeyga adeegga ama hagista. Kooxdu waxay leedahay xuquuq sharci oo ay ku galaan goobaha dadwaynaha. Waxay aadi karaan meel kasta oo dadwaynuhu aadaan. Xog badan ka ogoow **Eyada Adeegga ee jooga Alberta.**

## Xayawaannada mutadawacnimada

(Volunteer animals)

Xayawaannada qaar ayaa ka diiwaan gashan **Khayraadka Mutadawacnimada ee Alberta Health Services**. Waxaa loo baaray inay buuxshaan shuruudo gaar ah. Xayawaanadaan iyo mulkiileyaashooda ayaa booqda bukaanno badan si loogu sameeyo baxnaaninta xayawaanka.

**Si loo helo tallada kalkaalisada oo 24/7 ah iyo macluumaadka kale ee caafimaadka guud ka wac Health Link lambarka 811.** Haddii aad u baahan tahay turjumaan, keliya sheeg luuqada aad u baahan tahay.

**Markii U danbaysay ee La muraajaceeyay:** Arbaco, Bisha Sideedaad 30, 2023

**Qoraaga:** Kahortaga iyo Xakamaynta Caabuqa, Alberta Health Services

Agabkaan beddel uma ahan talada dhakhtarka xirfada leh. Qalabkaan waxaa loogu talagalay xog guud keliya waxaana loogu talagalay qaabka "sida ay tahay", "meesha ay tahay". Inkastoo dedaallada macquulka ah la sameeyay si loo xaqijiyo saxnaanta macluumaadka, Alberta Health Services cidna uma sameeyso mataalaad ama damaanad, hadal ahaan, qorala ahaan ama sharci ahaan, marka laga hadlaayo saxnaanta, u qalmida, dhamaystirka, waafiqida ama dhisnaanta jirka sababo gaar ah gaar ah oo la xariira oo macluumaadka noocaas ah. Alberta Health Services waxay iska bari-yeelaysaa dhammaan waxyeelada ka imaan karta isticmaalka macluumaadkan, iyo sheegashooyin, fici, dalabaad iyo dacwado kasta oo ka dhalan kara isticmaalka noocaas ah.